

Bayaanka Ka Hortagga Midabtakoorka ee Sinaanta U-hiiliya (PEAR) ee BIIA

Guddiga Rafcaannada Caymiska Warshadaha (BIIA) ayaa u heellan sii-wanaajinta cadaalad helidda qof ay dacwad ku socoto ama eedeysane ah iyada oo intii suuragal ahna la yareynayo ama meesha laga saarayo caqabadaha la xiriira bulshada, qaab-dhismeedka, iyo dhaqaalaha ee ugu badan si qof walba oo ku lug leh uu diiradda u saaro mudnaanaha rafcaanka. Waxaannu aqoonsanahay muhiimadda uu leeyahay doorarka hay'adeenna ee ku aaddan baabi'inta midabtakoorka nidaamiga ah ee ka jirta gudaha Gobolka Washington.

Waxaan ka warqabnaa raadraacyada kala duwan ee shaqaalaheenna iyo macaamiisheenna iyo sida takoorku uu u noqon karo siyaabo waxyeello badan leh. Waxaan mudnaanta koowaad siineynaa oo aan u qareemeynaynaa hirgelinta siyaasado, barnaamijyo, iyo hab-dhaqanno kor-uqaada cadaalad loo siman yahay.

Ballanqaadyada Dibedda

Waxaan naga go'an:

- Raadinta iyo ka jawaabidda jawaabcelinta macmiilka iyo bulshada ee ku saabsan shaqadeenna.
- Sii-wanaajinta wadhadallada iyo tiknoolajiyadda heer kasta ee hannaankeenna rafcaanka.
- Isticmaalka luuqad aqoonsaneysa qiimaha iyo sharafta uu shakhsi kastaba leeyahay.
- In macaamiisha oo dhan loogu adeego hab aanan sii wadeynin waayo-aragnimadooda nololeed ee dulmiga ama ka-saarista/reebista.
- Joogteynta deegaan ka hortagga midabtakoorka, oo sinnaanta u hiiliya.

Ballanqaadyada Gudaha

Waxaan naga go'an:

- In aan ku dedaalno shaqaaleynta shaqaale ka tarjumaya bulshooyinka dhaqamada kala duwan leh ee aan u adeegno.
- Xaqiijinta sinnaanta iyo ka hortagga midabtakoorka ee habraacyada iyo hanaanadeenna qorista shaqaalaha, shaqaaleynta, tababarka, dalacsiinta, iyo shaqo ku-sii-negaanshaha.
- Kobcinta deegaan bixinaya fursado loo siman yahay oo loogu talagalay shaqaalaha oo dhan.
- Kobcinta ruuxa bulshada ee hay'adeenna gudaheeda ah ee xaqiijineysa in cod kasta uu helo fursad lagu dhageysto.
- Caawinta shaqaalaheenna marka ay kobcinayaan aqoontooda iyada oo loo fidinayo adeegyada ka hortagga midabtakoorka, sinnaan, iyo u-dhammaan.

Waxaan si joogto ah u qiimeyn doonnaa una daraaseyn doonnaa bayaankan, ugu yaraan sannad kasta, si aan u xaqiijinno in aan horey u sii wadno ballanqaadyadeenna.

Ku taariikheysan: 27-ka Disembar, 2022.